

Dulmarka Deeqda Baahida Ku salaysan iyo Su`aalaha Inta badan la Isweydiiyo

Deeqaha Lagu Salaynaayo Baahida ayaa la heli karaa si loo taageero barnaamijyada waxbarashada dhallaanka ee ka qaybgalaaya Early Achievers si looga caawiyo iibsashada hormarinta manhajka, agabka casharada, adeegyada, agabka diirada lagu saaraayo saqiirada, hormarinnada bii'ada, iyo qalabka si kor loogu qaado tayada barnaamijka. Kahor intaadan codsan fadlan si adag u akhri xogtaan Dulmarka Deeqda Baahida Ku Salaysan iyo Su`aalaha Inta badan la Isweydiiyo si aad u hubiso inaad u qalanto. Barnaamij ayaa heli kara Deeqda Baahida Ku salaysan sanad miisaaniyadeed kasta oo gobalku leeyahay (Luuliyo 1 - Juun 30).

Adeeg bixiyaasha ruqsada leh ee guriga qoyska iyo xarumaha ka qaybgala Early Achievers ayaa u qalmi kara inay helaan Deeqda Baahida Ku salaysan oo dhan \$1,000.

Shuruudaha U qalmida

Ka qaybgalayaasha Early Achievers ayaa u qalmi kara deeqda haddii ay buuxiyaan shuruudaha soo socda:

- Waa inay ka diiwaan gashan yihiin Early Achievers, ama
- Waa inay ka diiwaan gashan yihiin Early Achievers ayna leeyihiin tayada kama danbaysta ah ee heerka 2 aad ama ka badan

Waana inay buuxshaan ugu yaraan mid kamid ah waxyaabaha soo socda:

- Waa inay ka diiwaan gashan yihiin barnaamijka cuntada ee Qaybta 1 aad
- Waa inay ku yaalaan gudaha degmo dugsiiyeed u adeegta ugu yaraan 20% carruurta danyarta ah ayadoo laga eegaayo xogta Xafiiska Kormeeraha Guud ee Casharada Dadwaynaha (Office of Superintendent of Public Instruction, OSPI). Wixii xog dheeraad ah oo ku saabsan sida loo go'aansho haddii degmada dugsigaagu ay buuxinayso shuruudahaan, fadlan akhri qaybta Su`aalaha Inta badan la Isweydiiyo

Muhiimad siinta

The Washington State Department of Children, Youth, and Families (DCYF, Waaxda Gobalka Washington u qaabinsan Carruurta, Dhallaanka iyo Qoysaska) ayaa muhiimada siin karta codsiyada ka qaybgalayaashaas keena adeegyada la siinaayo carruurta aan gaarin da'da dugsiga ee helaaya kaalmooyinka Working Connections Child Care (WCCC, Daryeelka Carruurta ee Working Connections) ayadoo raacaysa qiyaasta boqonkiiba carruurta helaysa adeegyada xarunta ama daryeelka guriga qoyska ee ruqsada leh, iyo barnaamijyada muujiya inay baxshaan adeeg dhaqan ahaan iskudhafan.

Deeqaha Lagu Saleeyay Baahida ayaa loo adeegsan karaa in lagu iibsado noocyada soo socda ee agabka:

- Abuurista manhajka iyo agabka casharada
- Agabka iyo qalabka
- Hormarinnada diirada lagu saaraayo saqiirada iyo socod baradka
- Hormarinnada bii'ada/dayactirada yaryar ee lagu samaynaayo xarunta daryeelka carruurta
- Taageerooyinka, agabka, ama adeegyada carruurta qaba baahiyaha gaarka ah
- Agabka lagu hormarinaayo buundooyinka Cabirka Tayada Bii'ada (Environment Rating Scale, ERS) ama Nidaamka Buundaynta Qiimaynta Fasalka (Classroom Assessment Scoring System, CLASS)
- Waqtiga badalka ah
- Tababarka/hormarinta xirfada



- Agabka kale ama qalabka kor loogu qaadaayo tayada barnaamijka, sida uu aqoonsaday tababaraha uuna ansixiyay ayadoo la raacaayo xogta ku jirta qorshaha maal gelinta ee codsiga

Maal gelinnada ayaan loo adeegsan karin hormarin lacagta biloowga ganacsiga, kaararka hadiyada, kordhinta mushaarka, abaal marinnada noocay yihiinba, ama shaqooyinka diinta. Fadlan ka fiiri Tilmaamaha Shaqada ee [Early Achievers, Qaybta 11: Taageerooyinka iyo Abaal marinnada](#), si aad u hesho xog dheeraad ah oo ku saabsan qarashaadka aan deeqda loo adeegsan karin.

Hanaanka Codsiga

Codsiyada waa in la buuxshaa laguna diraa [WA Compass](#) ilaa in luuqadaada hooyo ay tahay maahee Isbaanish ama Soomaali. Wixii tilmaamo ah iyo helitaanka codsiga ood ku samayso kumbuyuutarka ama aalada moobeelka, booqo: <https://wacompass.force.com/login>.

Ama

Dukumiintiyada codsiga oo lagu turjumay af Isbaanish iyo Af Soomaali ayaa laga heli karaa webseedka DCYF: <https://www.dcyf.wa.gov/services/early-learning-providers/early-achievers/pre-rating>. Codsiyada la buuxshay ee Isbaanishka iyo af Soomaaliga ku qoran ayaa boostada ama iimeelka loogu diri karaa DCYF:

Ciwaanka Boostada:

Department of Children, Youth, and Families
Attn: Early Achievers Needs-Based Grants
P.O. Box 40970
Olympia, WA 98504-0970

Ciwaanka Iimaylka:

dcyf.needsbasedgrants@dcyf.wa.gov

Si aad u hesho lacagaha Deeqda Baahida Lagu Saleeyay, ka qaybgalaayshu waa inay lahaadaan Lambarka Mushaar Qaataha Adeegga ee Gobalka oo dhan (Statewide Vendor Payee, SWV). Foomamka SWV iyo tilmaamaha ku aadan sida loo diro ayaa laga heli karaa webseedka DCYF:

<https://dcyf.wa.gov/services/early-learning-providers/licensed-provider/vendor-number>.

Su'aalaha Inta Badan la Isweydiyo

Sidee ayuu ka qaybgale ku ogaan karaa haddii uu joogo degmo dugsiyeed u qalanta deeqda?

Degmo dugsiyeedyada u qalma waxaa ku jiri kara kuwa ugu yaraan 20% ardaydu helaan cuntooyinka bilaashka ah ama qiimaha jaban. Si aad u go'aansato haddii degmo dugsi u qalanto, booqo: Xogta Dugsiyada Dadwaynaha ee Washington ee Warbixinta Xogta Aagga U qalma Deeqda ee ku jira webseedka OSPI: <https://www.k12.wa.us/data-reporting/reporting/child-nutrition-program-reports>.

Ka qaybgale kasta oo u qalma Early Achievers ma codsan karaa Deeqda Baahida Ku salaysan, xataa haddii uusan la shaqayn wakiilka Child Care Aware of Washington?

Yaa.

Barnaamijka Waxbarashada Dhallaanka iyo Caawimaada (Early Childhood Education and Assistance Program, ECEAP) oo ku jira hanaanka ruqsada ka haysta Early Achievers ma codsan karaa deeqda?

Yaa.

Taariikhda La muraajaceeyay: Juun 30, 2021

U qalmida iyo Taageerooyinka Adeeg Bixiyaha | Waxaa Qaybinta u Fasaxay Amy Russell, Maamulaha Shaqada

Ka qaybgale ma codsan karaa Deeqda Baahida Ku salaysan, xataa haddii uusan u adeegin carruurta helaaya kaalmooyinka WCCC?

Yaa.

Ma loo adeegsan karaa deeqda in lagu mago waxyaabaha uu horay u soo iibsaday ka qaybgaluhu?

Maya, maal gelintaan waxaa keliya loo adeegsan karaa khayraadka lagu aqoonsaday codsiga Deeqda Baahida ku Salaysan marka deeqda la fasaxo lacagtana uu helo adeeg bixiyuhu.

Ka qaybgale ma codsan karaa cadad ka badan inta loo ogol yahay?

Maya. Cadadka ugu badan ee Deeqda Baahida Ku salaysan waa \$1,000 dhammaan ka qaybgalayaasha. Ma jirto deeq la bixinaayo oo ka badan \$1,000.

Xarun ma la qiimayn karaa kadibna ma heli kartaa Deeqda Baahida ku Saleysan?

Haa, xarun leh Tayada kama danbaysta ah ee Heerka 2, 3, 3+, 4, ama 5 ayaa codsan karta Deeqda Baahida ku salaysan.

Adeeg bixiyaashu ma u baahan yihiin inay kaydiyaan risiidyada?

Haa. Sida lagu sheegay Shuruudaha iyo Xeerarka ku jira codsiga Deeqda Baahida ku Saleysan, xarunta deeqda helaysa waa inay haysaa dhammaan risiidyada sheegaaya waxyaabaha ay ku iibsatay deeqda muddo todobo sano ah ayna aqbashaa inay keento risiidyada iyo dukumiintiyada oo la siinaayo DCYF sheey kasta/dhammaan agabka lasoo iibshay ee deeqdaan la xariira, markay codsato. Ku fashilmida ku dhaqanka shuruudahaan ayaa keenaysa in xaruntu ay dib u dhiibto qayb, ama dhammaan, lacagaha deeqda ayna u celiso DCYF.

Maxaa Mushaar Qaataha Adeeg Bixiyaha Gobalka oo dhan iyo foomamka W-9 loogu baahan yahay in la buuxsho lana soo gudbiyo?

Deeqaha ku salaysan Baahida ayaa la siiyaa dadka deeqda u qalma ayadoo uu gobalku toos u baxsho. Gobalka Washington ayaa doonaaya in qof kasta oo helaaya lacagaha gobalka uu isku diiwaan gasho adeeg bixiye.

Ka waran haddii aan horay u lahaa lambarka SWV?

Haddii aad aaminsan tahay inaad haysato lambarka SWV, waxaad ka fiirin kartaa kaydka xogta ee oonleenka ah: <https://ofm.wa.gov/it-systems/accounting-systems/statewide-vendorpayee-services/statewide-vendor-number-lookup>. Haddii aadan haysan lambar, waa lagu samayn karaa mid adoo buuxinaaya diraayana [Foomka Mushaar Qaataha Adeeg Bixiyaha Gobalka Washington iyo foomka W-9](#) raacinaayana codsigaaga gobalka. Haddii aad haysato lambar laakiin aysan kasoo muuqan codsigaaga deeqda ee aad u dirtay WA Compass, la xariir dcyf.statewidevendorregistration@dcyf.wa.gov una keen lambarkaaga SWV iyo lambarkaaga Aqoonsiga Adeeg bixiyaha ruqsada leh.

Waxaan buuxshay dukumiintigayga Adeeg Bixiyaha Gobalka Lacagta ka qaata. Maxaan u heli waayay lambarka wali?

Sabab la xariirta xasaasinimada foomamkaan, xoqida, caddaan marinta, ama isbadallo kasta oo kale oo foomamkaan lagu sameeyo ayaa ka hor istaagaaya in laga shaqeeyo. Fadlan xaqiiji in foomamka si buuxda loo buuxshay ayna saxan yihiin, adoon wax isku talaab ah saarin ama meel tirin. Haddii aadan helin lambarka SWV ama xog kale oo kasta 10 maalmood oo kuwa shaqada ah gudahood kadib markaad dirto dukumiintiga Adeeg Bixiyaha Gobalku maal Gasho, la xariir dcyf.statewidevendorregistration@dcyf.wa.gov.

Adeeg bixiye ma heli karaa wax ka badan hal Deeqda Baahida Ku salaysan ah?

Barnaamij u qalma ayaa codsan kara Deeqda Baahida Ku salaysan halmar sanad maaliyadeed kasta (Luuliyo 1 - Juun 30).

Muxuu ka qaybgaluhu filan karaa marka uu diro codsiga Deeqda Baahida Ku salaysan?

Marka codsiga Deeqda Baahida Ku salaysan lagusoo diro WA Compass, xaalada codsiga ayaa iska badalaysa "new (cusub)" iskuna badalaysa "in progress (shaqaa ku socota)." DCYF ayaa akhrin doonta codsiyada lasoo diray si loo hubiyo inay dhamaystiran yihiin. Haddii codsiga ay qayb ka maqan tahay ama uu u baahan yahay talaabo dheeraad ah oo uu adeeg bixiyuhu qaado, xaalada ayaa loo badalayaa "incomplete (waxbaa ka dhiman)", ka qaybgalaha waa loo sheegi doonaa ayadoo la siin doono tilmaamaha sida uu codsiga wax ugu dari karo.

Haddii uu codsiga ka maqan yahay lambarka SWV, xaalada ayaa isku badalaysa "pending SWV (wuxuu sugayaa SWV)." Haddii codsiga leeyahay lambarka SWV oo xiran ama khalad ah, xaalada ayaa isku badalaysa "pending SWV" DCYF ayaana u sheegi doonta ka qaybgalaha ayadoo siinaysa tilmaamaha sida uu ku helaayo lambarka shaqaynaaya, ee saxda ah ee SWV.

Codsiyada la buuxsho ayaa laga shaqeeyaa si loo aqbalo lacagtana loo siiyo. Caadiyan, hanaankaan ayaa qaata 4-6 asbuuc. Marka codsi la aqbalo kadibna loo gudbiyo lacag bixin, xaalada ayaa isku badali doonta "accepted (waa la aqbalay)", ogaysiis dheeraad ah ayaana loo diraa ka qaybgalaha. Ogaysiisyada waxaa lagusoo gudbiyaa iimeelka.

Yaan la xariirayaa haddii aan qabo su'aalo?

Wixii xog dheeraad ah oo ku aadan u qalmida deeqda/qarash garaynta, iimeel u dir

dcyf.needsbasedgrants@dcyf.wa.gov.

Wixii su'aalo ah oo ku aadan helitaanka WA Compass, iimeel udir dcyf.providerportal@dcyf.wa.gov.